# Baaritaanka mindhicirka yar ee ilmaha, oo lagu sameeyo raajo qaadis loo adeegsado maaddo si fiican u soo saarta barta la sawirayo, ee isbitaalka cusub ee carruurta

**Lapsen ohutsuolen varjoainetutkimus Uudessa lastensairaalassa**

Baaritaankaan waxaa lagu baarayaa shaqada iyo dhaqdhaqaaqa mindhicirka yar.

Inta uu baaritaanku socdo waxaa ilmaha la siinayaa maaddo si fiican u soo saarta barta la sawiraayo (varjoaine), waxaana iyadoo la raacaayo ku dhex socodkeeda jirka sawir raajo ah laga qaadayaa caloosha.

Baaritaankaan waxaa sidoo kale lagu magacaabaa (passage).

Fadlan waxaad baaritaanka ugu soo talaggashaa wakhti dhan illaa 8 saacadood. Sida badan baaritaanku wuxuu qaataa 3–6 saacadood, iyadoo ay ku xiran tahay hadba sida maaddadaasi wax muujinaysa ay ugu dhex socoto mindhicirka.

Ilmaha u baahan baaritaanka degdegga ah waxaa laga yaabaa in baaritaanka lagu sameeyo kahor ilmahaaga.

Waraqdda hagista ama tilmaanbixinta ee imaanshaha waxaa ku qoran dhammaan macluumaadka ku saabsan halkii aad la soo xiriiri lahayd, haddii aad qabto wax su’aalo ah oo ku saabsan baaritaanka.

## Baaritaanka kahor

Ilmaha wax ma cuni karo, sidoo kale waxna ma cabbi karo baaritaanka kahor

- carruurta ka yar 1 sano, illaa 3 saacadood
- carruurta ka weyn 1 sano, illaa 4 saacadood

Maalinta ka horraysa maalinka baaritaanka, ilmaha looma oggola cabitaannada uu ku jiro asiidh kaarboonka (hiilihappo).

Waxaad ilmaha u keeni kartaa cunto iyo cabitaan, sababtoo ah dhamaadka baaritaanka ilmaha waxaa loo oggolaan doonaa inuu wax cuno oo cabo.

## Inta lagu guda jiro Baaritaanka

Inta uu baaritaanku socdo waxaa ilmaha la seexinayaa miiska baaritaanka.

Ilmaha waxaa la siinayaa maaddo si fiican u soo saarta barta la sawiraayo (varjoaine), iyadoo lala soconaayo ku dhex socodkeeda jirka illaa ay ka gaarto mindhicirka weyn.

Inta u dhexeysa wakhtiyada sawirrada la qaadaayo, ilmaha wuxuu joogayaa qolka sugitaanka.

Inta baaritaanka lagu guda jiro, ilmaha looma oggola cunto ama cabitaan midna, illaa ay dhakhtarka raajada ama kalkaalisada raajada ka siiyaan oggolaanshaha arrinkaas.

## Baaritaanka kaddib

Dhakhtarka ilmahaaga daryeelaya ayaad ka heli doontaa jawaabaha baaritaanka.

Haddii aadan helin hagista ama tilmaanbixinta ku saabsan daawada, waxaad maalinka baaritaanka ka horreeya soo wacdaa waaxda ama qaybta baaritaanka u soo dirtay ilmahaaga

## Waxyaabaha kale ee muhiimka ah

Hore u soo qaad kaarka Kela-da ama kaarka aqoonsiga ee ilmaha.

Hal qof oo weyn ayaa ilmaha la joogi kara inta baaritaanka lagu guda jiro. Haweeneyda uurka leh ama looga shakisan yahay in ay uur leedahay ma geli karto qolka sawirka.

Ma jirto wax kharash gooni ah oo ka imanaaya dhanka baaritaanka.

Haddii aadan iman karin, fadlan iska baaji ama iska kansal wakhtiga ballanta.